

#GrandUnderstandings

Fariintayada ku Socota Qoysaska Ayeey-korisayga

Daryeelkaaga carruurta carruurtaadu dhashay waa muhiim hadda iyo mustaqbalkaba. Waxaanu garawsannahay in korinta carruurta carruurtaadu dhashay iyo taageeridda waxbarashadoodu iyo korriinkoodu ay hawl badan kaaga baahan yihiin. Haddaanu nahay Xarunta Kaqaybgalka Qoyska ee Gobolka Ohio oo Dhan, waxaanu heegan u nahay inaanu kaa caawino la shaqaynta dugsiyada, iyo inaanu kuu tilmaano khayraad faa'ido leh. Hoos waxaad ka heli doontaa talooyin kusalaysan casharrada aanu ka baranay qoysaska ayeey-korisayga iyo cilmibaaris. Liiskan waxa kujira khayraad aad isticmaali karto si aad u taageerto waxbarashada iyo caafimaadka carruurta carruurtaadu dhashay, iyo fayyo-qabka qoyska oo dhan.

KALIDAA MA TIHID.

185,469
carruur ah
gudaha gobolka Ohio
ayaa la nool
waalidka
waalidkood.



Mashruuca GrandUnderstandings ee Xarunta Kaqaybgalka Qoyska ee Gobolka Ohio oo Dhan wuxuu ka shaqaynayaa horumarinta sida dugsiyada iyo bulshooyinku u taageeraan ayeeyda iyo awoowga korinaya carruur da'da dugsiya kujira. Marka qoysaska ayeey-korisayga, dugsiyada iyo bulshooyinku wada shaqeeyaan, carruurta waxbarashada way ku fiicnaadaan noloshooduna way hagaagtaa.



WAKHTI HORE XIRIIR LA SAMEE BARAYAASHA.

Sida ugu dhakhsaha badan, xiriir ula samee barayaasha. Dugsiyadu waxay kaa caawin karaan khayraadka si aad u taageerto u soo wareegidda carruurta carruurtaadu dhaleen ee gurigaaga, iyo inay kaa caawiyaan arrimaha laga yaabo inay waajahaan -- waxyaalaha sida **dhiirgalinta iyo usoo jeedsashada waxbarashada, guulaysiga tacliineed, ama saaxiibtinimada**. Sidoo kale, waxay karaan ku siiyaan **ADIGA taageero niyadeed, kula fiiriyaan macluumaadka dugsiya, oo kugu xiraan qoysaska kale ee ayeey-korisayga**.

Taageerada iyo Khayraadka Niyadeed

- Macallimiinta
- La-taliyayaasha Dugsiga
- Adeegayaasha Bulshada ee Dugsiga
- Maareeyayaasha
- Dhakhaatiirta Cilmi-nafsiga
- Kalkaalisoooyinka Caafimaadka ee Dugsiga



XIRIIR LA SAMEE DADKA KALE EE BULSHADAADA.

Qoysas badan oo ayeey-korisay ah waxay ka faa'ideen helitaanka **taageerada dadka kale** sidoo kale. Ka feker cid aad la xiriiri karto si aad taageero uga hesho.

Xiriirada soo socda waxa dhici karta **inay ku siiyaan taageero dheeraad ah:**

- Qaraabada
- Ururada Diimeed
- Ayeeyooyinka/Awoowyaasha Bulshada
- Saaxiibtimada Taageero Shakhsi ahaan
- Kooxaha Bulsheed



XIRIIR LA SAMEE KHAYRAADKA.

Ururada soo socda waxa dhici karta inay kaa caawiyaan inaad daboo sho baahiyahaaga **dhaqaale iyo nafaqo ee qoysaska ayeey-korisayga**.

Khayraadka Dhaqaale:

- Kaalmada Kumeel Gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF)
- Dakhlaga Sooshiyaal Sikiyuuriti
- Iskaashiga Ayeeyda iyo Awoowga/Xigtada ee Ohio
- Naakhuudaha Xigtada (sharciga, dhaqaale, waxbarasho & gudbino)

Khayraadka Cuntada:

- Barnaamijka Kaalmada Cuntada Xaaladda Gurmada ah (TEFAP)
- Barnaamijka Cuntada ee Ohio
- Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP)